

Ardayda Winooski ee ka hortagga midab-takoorka

Waxay wax ku Dalbadeen Gudiga

Iskuulka

Ardayda Winooski ee ka hortagga midab-kala-sooca waxay u soo bandhigeen dalabkooda Golaha Dugsiga (WSD) Arbacadii, Julaay 15-keedii, 2020. Guddigu waxay u codeeyeen inay aqbalaan dalabkooda waxayna kulankooda Arbacada, Juulaay 22, 2020 ka wadaagi doonaan qorshe qaabka loo xirgelin doono

Waa kuwaan 8da dalabaad ee ardayda:

- 1.** Si dhakhso haloo sameeyo Guddi loo xilsaaray abaabulka ololaha dhageysiga ardayda iyo qoysaska, ee la xiriira dhacdooyinka midab kala sooca, cunsuriyadda, iyo caddaalad darrooyinka ka dhacay Degmadda Dugsiga Winooski (WSD) waqtiyadii la soo dhaafay. Guddigu waa inuu u sheegaa wixii soo ogaada bulshada isla markaana Guddigu waa inuu qaadaa ficillo munaasib ah si loo hubiyo inaysan shilalka noocaas oo kale ah aysan markale ka dhicin Degamada Dugsiga Winooski.
- 2.** Bilowga sanad dugsiyeedka 2020-2021, samee gudi joogto ah oo ardayda wajahaysa midab-kala sooca, eexda iyo takoorida oo toos uga gudbin karaan dhacdooyinkaan
- 3.** Ku beddela Sarkaalka Iskuulka (SRO) labo (2) ku takhasusay dhaawacyada si ay ula shaqeeyaan ardayda PreK-12.
- 4.** Dhamaadka Xagaaga 2020, si fagaare ah ula yimaada qorsho Degmada Dugsiga Winooski lagu shaqaaleysiinayo macalimiin badan oo midabo kala duwan leh. Sidoo kale waa inaad sameysiin balanqaad cad oo qoraal ah si loo hubiyo in ugu yaraan 15% ee dhammaan shaqaalaha wax ku bara Degmada Dugsiga Winooski (WSD) ay yihiin macalimiin midabo kala duwan leh sanad dugsiyeedka 2022-2023
- 5.** Isla markiiba waa inay macalimiintooda weydiyaan inay ku daraan qaybaha manhajka daraasaadka qowmiyadeed iyo barista ka-soo horjeedka cunsuriyadda in qeyb looga dhigo manhajka fasalda K-12. Waa inay sidoo kale bilawdaan barnaamij waxbarashadda qowmiyadeed si buuxda loo maalgeliyo bilowga sanadka 2022-2023.
- 6.** Samee guddi dib-u-eegis ah dhammaadka Ogosto 2020 oo loo xilsaaray mas'uuliyadda dib-u-eegista iyo qiimeynta manhajka jira, dhaqannada baridda, iyo qaab-dhismeedka siyaasadeed si loo hubiyo inay la jaan-qaadaan daraasadaha qowmiyadeed iyo heerarka ka-soo-horjeeda cunsuriyadda, rajooyinka, iyo dhaqanka baridda.
- 7.** U shaqaaleeya ardayda xirfadle' xuquuqda aadanaha labadii sano hal mar tababara taas oo waxbarasha iyo caawin u noqon karaa ardayda iyo waalidiinta say u fahmaan si looga doodo cayaalkooda iyo haqa waxbarashada ay ku leeyihii Degmada Dugsiga Winooski. Aqoon isweydaarsiyadan waa inay diirada saaraan xeerkanka dowlada sare (federaalka) iyo kuwa maxalliga ah ee la xiriira xuquuqaha ardayda "ELL" iyo sidoo kale ardayda naafada ah, xuquuqaha madaniga ah iyo sharciyada la-dagaallanka takoorka, iyo mas'uuliyadaha iskuulka ee meelaha ay ka mid yihiin kaeeybgalinta qoysaska iyo in si ku filan loo taageero ardayda dakhligoodu hooseeyo.
- 8.** Bilowga sanad dugsiyeedka 2020-2021, U bilow ardayda ELL barnaamij la talin ah, taas oo dhamaan ardayda lagu xiraayo lataliyayaal ka mid ah bulshada iyada oo ujeedadu tahay in la wanaajiyo xirfadahooda luqadda Ingiriisiga iyo in la helo rafiq u doda bulshada dhexdeeda.